## Tallooyin fiican oo loogu talo galay qofka isticmaalaya daawada:

- Baro adigu magaca maadada waxtarka leh ee daawadaada ku jirta. Haddii aanad hubin adigu taas, waydii dhakhtarkaaga ama qofka farmashiiyaha ka shaqeeya.
- Ha ku taalo warqada yar ee lagu dhejiyey baakeedka korkiisa oo haka goyn. Halkaas waxa badanaa ku yaala daawada dhakhtarku kuu qoray, daawooyinka isku dhigma ee adiga lagu siiyey magacooda, iyo daawada waxtarka leh.
- Markasta u sheeg dhakhtarkaaga haddii aad adigu xasaasiyad leedahay. Markaa dhakhtarku feker ayuu ka qaadanayaa inay adiga kugu haboon tahay in daawada laguu bedelo.
- Waydii kuwa farmashiiyaha ka shaqeeya ama dhakhtarkaaga haddii aad ka shakisan tahay sidaad u isticmaalayso daawooyinkaaga.

## Su'aale kale oo ku saabsan daawooyinkaaga ama sida loo bedelayo kuwa asalka ah?

**Waydii farmashiiyaha ama dhakhtarkaaga**
Marka hore la xiriir shaqaalaha ka shaqeeya farmashiiyahaaga ama dhakhtarkaaga. Iyagu aqoon badan ayay u leeyihiin waxyaabaha ku saabsan daawooyinka. Kharashka ilaalinta sare iyo waraaqaha dhakhtarku kuu soo qoro.

**La xiriir warbixinta daawooyinka**
0771 – 46 70 10
Warbixinta daawooyinka waxa laga helayaa Hay'adda daawooyinka. Halkaas ayaad wacaysaa oo aad waydiinaysaa su'aalaha guud ee daawooyinkaaga ku saabsan.


**Ka akhri bogga internetka ee Hay'adda daawooyinka**
www.lakemedelsverket.se/utbyte
Bogga internetka ee Hay'adda daawooyinka waxaa ku jira warbixin guud oo ku saabsan daawooyinka.

*Warqadan oo warbixintan ka akhrisatay waxa soo saaray Hay'adda daawooyinka , oo iyaga ayaana ansaxiya ama oggolaada daawooyinka lagu gado Iswiidhan iyo kuwa daryeelka ilkaha- iyo weliba hay'adda dheefta daawooyinka, TLV, oo kuwaas go'aamiya qiimaha iyo kabitaanka dhaqaalaha dawlada ee daawooyinka.*

# Bedelaad aad ku kalsoon tahay oo farmashiyuhu

## - daawo isku dhigma oo qiimo jaban

Marka aad farmashiyaha ka soo qaadanaysid dawo dhakhtarku adiga kuu qoray waxaa badanaa dhacda in adiga lagugu casuumo dawo la mid ah tii laguu qoray oo qiimaheedu hooseeyo. Waxaa la orankaraa waa hab bedelid oo daawada isku mid yihiin.



TLV
TANDVÅRDS- OCH LÄKEMEDELSFÖRMÅNSVERKET

LÄKEMEDELSVERKET
MEDICAL PRODUCTS AGENCY

## Maxaa loo bedelayaa daawadaada?

Dawada waxa loo bedelaa in aanu qofna u baahan inuu daawo ka bixiyo inta laga maarmanka ah in ka badan, adiga iyo bulshada inteeda kaleba. Marka ay shirkadi soo saarto dawo cusub, waxa la odhan karaa waa dawadii asalka ahayd, waxay shirkadu xaq u leedahay inay keligeed samayso kadibna ay keligeed gado muddo cayiman. Wakhtigaa ka dib shirkadaha kale ayaa samayn kara dawo lamid ah oo ay isku maadooyin ku jiraan, dawadii asalka ahayd. Tartankaa jira awgii ayuu qiimihii hoos ugu dhacay.

Farmashiiyaha waxaa khasab ku ah in ay soo bandhigaan dawo la mid ah oo qiima hoose leh. Haddii aynu maanta isku qiimo bixin lahayn markii ay dawado soo baxday oo aanay jirin shirkad kale oo kula tartanta, kharashku aad ayuu u badnaan lahaa ilaa iyo 8 bilyan oo karoon sannad walba. Wuxuu kharashka sannadkii u dhigmi lahaa in lawado ama lahaysto ilaa 300 oo ah meelaha rugta daryeelka caafimaadyada ah.

## Maxay dowooyinka isku dhigmaa ay aragtidoodu u kala duwan tahay?

Dawadu waxay kakooban tahay, maadada ay ka samaysan tahay mooyaane, xitaa waxa ku jira maado caawisa taas oo daawada siisa midab, qaab iyo dhadhan. Dawooyinka isku midka ah waxay ka koobanyihiin oo ku jira maado isku mid ah oo isku dhigma, laakiin maadooyinka caawinaya ayaa kala duwan. Sidaa daraadeed ayay aragtidooduna u kala duwan yihiin.




## Dawooyinka isku dhigmaa ma waxtar isku mid ah ayay leeyihiin?

Haa, daawooyinka isku dhigma waxaa ku jira maado waxtar leh oo isku dhigma, waxa laga helayaa waxtar isku mid ah daawooyinka oo jirka isku si ayay ugu shaqaynayaan. Taasna micnaheeda waxey tahay in la isku bedelikaraa.

## Mala hubaa dawooyinka isku dhigma?

Haa, dawooyinka isku digma waala hubaa, oo qiimaha kuma xirna. Daawooyinka oo dhan Hay´adda daawoyinka ayaa baadha oo hubisa intaanan iibis loo ban dhigin. Hay´adda daawoyinka isku si ayey u baadhaa oo ay u hubisaa daawooyinka asliga iyo kuwa lagu bedelo iney jirka isku si ugu shaqeyaan.

Daawooyinka oo dhan waxaa laga helikaraa waxtaryo aan loo baahnayn, waxyeelooyin. Waxaa waxtarka aan loo baahnayn inta badan waxaa sabab u ah maadada waxtarka leh. Waxyeelooyinka waxa lagu sharaxaa warbixino kala duwan kuwaas oo ku jira warqadda baaketka la socota, inkastoo ay daawooyinku isku dhigmaan. Haddii aad adigu kala kulanto waxyeelo daawadaada ama isbedel waxtar leh, waxaad la xiriiraysaa dhakhtarkaaga ama kan farmashiiyaha ka shaqeeya.

## Adiga ayaa go'aaminaya daawooyinkaaga

Adiga ayaa go'aaminaya haddii daawadaada midkale laguugu bedelayo, laakiin doorashadaadu waxay saamayn ku yeelanaysaa kharashka aad bixineyso. Farmashiiyuhu wuxuu kuu soo bandhigayaa daawada tan ugu jaban. Daawada ay noqonayso way kala duwanaan kartaa mararka aad booqanayso farmashiiyaha. Daawooyinka aan ku jirin kharashka ilaalinta sare [högkostnadsskyddet] lacagtooda waad wada bixinaysaa.

*Jadwalkan waxaad ku aragtaa tusaalooyin daawooyinka isku dhigma oo la isku bedelo. Daawada A waxay ku taalaa warqada laguu qoray, laakiin daawada B qiimaheeda ayaa raqiis ah. Labada daawaba waxay ku jiraan kharashka ilaalinta sare.*

| Farmashiiyaha | Kharashkaaga |
|---|---|
| Farmashiiyuhu wuxuu adiga kugu casumay Daawada B ka dibna waxaad adigu doorátay B. | Kharashka Daawada B oo dhan wuxuu ku jiraa kharashka ilaalinta sare ama (högkostnadsskydd) |
| Farmashiiyuhu wuxuu adiga kugu casumay daawada B laakiin waxaad adigu doonaysaa daawada A, taas oo warqada dhakhtarku kuu qoray ku taala. | Faraqa u dhaxeeya A iyo B adiga ayaa iska bixinaya, inta kale waxay kuugu jirtaa kharashka ilaalinta sare ama (högkostnadsskydd). |
| Dhakhtarkaagu wuxuu go'aamiyey in aan daawadaada midkale lagu bedelin. Farmashiiyuhu wuxuu ku siinayaa Daawada A. | Kharashka Daawada oo dhan wuxuu kuugu jiraa kharashka ilaalinta sare ama (högkostnadsskydd). |
| Farmashiiyuhu wuxuu kugu casumay Daawada B. Adiguna ma rabtid hadday noqoto taas ama Daawada A, ee waxaad rabtaa mid sadexaad oo u dhiganta inaad ku bedelato. | Kharashka ma daboolayso kharashka ilaalinta sare ama (högkostnadsskyddet) ee waa in aad adigu iska wada bixisid daawada oo dhan. |